## Qiimeynta SAGE waa xaq waa sax, waxayna muujiyaan qiimaha hiddaha Utah, iyo waxay si sax ah u qiimeyaan Heerarka Aqoonta Utah (Utah Core Standards).

Qiimeynta SAGE waxay gaar u yahiin Utah. Waxaa si gaar ah loogu sameyay ardayda Utah sida waafaqsan habka soo saarka imtixaan laga taxadiray oo wax kasta laga helo. Habkaan waxaa ka mid ah tababarada horumarinta ay ku lug leeyahiin macalimiinta Utah iyo fiirinta Xafiiska Waxbarashada Gobolka Utah (Utah State Office of Education) (USOE), aqoonyaanada horumarinta imtixaanka, tababareyaasha iyo muwaadiniinta Utah, iyo guddiga fiirinta imtixaanka kaasoo ka kooban waalidiinta Utah.

## Haddii aad dooneysid in aad

- Qaadatid imtixaanka tababarka,
- Horay u fiirisid noocyada su'aasha tusaalada, ama
- In badan ka ogaatid imtixanaadka ku kooban qofka, www.sageportal.org.

## Maxuu yahay imtixaanka ku kooban qofka (adaptive test?

Mar kasta uu ardayga ka jawaabo su'aal, jawaabtiisa ama jawaabteeda waxay kaalmo u tahay helitaanka su'aasha xigta ee loo baahan yahay in ardayga uu ka jawaabo.
Adkaanta lagala kulmo imtixaanka waxay la socotaa aqoonta arday kasta, taasoo cabbir fiican ka bixisa waxa arday kasta uu yaqaan iyo waxa uu samayn karo.

## Su'aalaha imtixaanka SAGE waxaa fiiriyay waalidiinta Utah.

Bishii Nofeembar 2013, Guddiga Fiirinta Waalidka (Parent Review Committee), ee ka kooban toban iyo shan waalidiinta Utah, kuwasoo ay magacaabeen Madaxa Senateka Gobolka Utah (Utah State Senate President), Afhayeenka Aqalka Utah iyo Madaxa Guddiga Waxbarashada Gobolka Utah (Utah State Board of Education Chair), waxay ku qaadatay shan maalin fiirinta su'aalaha imtixaanka SAGE. Xubin kasta oo ka tirsan guddiga wuxuu soo jeediyay faalo wanaagsan oo ku saabsan habka iyo nuxurka su'aalaha. Xagayga (fall) waxaa kulmi doono guddiga waalidka si ay u fiiriyaan su'aalaha cusub iyo haddii ay jiraan su'aalo la baddalay oo la xariira sannadkii la soo dhaafay. Sannad kasta waxaa la dooran doonaa xubno cusub si ay u buuxiyaan boosaska ka banaan waalidiinta dhamaystay muddadii lagu magacaabay hawsha. Waalidiinta rabta in ay ka qeybgalaan guddigaan waa in ay la xariiraan madaxa Guddiga Waxbarashada Gobolka, Afhayeenka Aqalka, ama Madaxa Senateka.

## Si aad u heshid macluumaad badan...

booqo Xariirka SAGE Portal ee laga helo **www.sageportal.org**.

**SAGE waxay u taagan tahay Qiimeynta Ardayga xagga Koriimada iyo Heerka Sare.**

# Macluumaadka la siiyo Qoysaska ku jira Siistemka Qiimeynta SAGE ee Utah

*SAGE waa Siistemka Qiimeynta Utah (Utah Assessment System).*
*Utah waxay leedahay iyo waxay kantaroosha qiimeyntaan.*
*Waxaa soo saaray Utah, waxaana loo soo saaray Utah.*

Utah State Office of Education

## SAGE waxay u taagan tahay Qiimeynta Ardayga xagga Koriimada iyo Heerka Sare (Student Assessment of Growth and Excellence).

SAGE waa siistemka qiimeynta loo sameyay in lagu cabbiro guusha iyo koriimada ardayga muddo sannooyin. Imtixanaadka SAGE waxay ku saleysan yahiin Heerarka Aqoonta Utah (Utah Core Standards), heerar waxbarasho oo kor u qaada waxa aan ka fileyno ardayda iyo macalimiinta. Siistemka SAGE waxaa ka mid ah:

Isugeynta imtixanaadka dhamaadka sannadka ee qiimeeya sida dugsiyadena iyo dagmooyinkena u shaqeyaan. Imtixanaadkaan waxay baddalaan CRTyadii horay loo qaadan jiray dhamaadka sannad dugsiyeedka.

Imtixanaadka dhexe, xilliga xagayga (fall) iyo qaboobaha, lana socdo horumarka ardayga. Imtixanaadkaan waxaa bixiya dugsiga iyo dagmooyinka doorta in ay fulliyaan.

Waa qiimeyn iyo qoraalo lagu taageero tababarka ay ardayda, qoysaska, iyo macalimiinta ka heli karaan internetka

## Ardayda waxay bilaabi doonaan in ay qaataan qiimeynta SAGE sannadkaan.

Laga bilaabo guga (spring) 2014, ardayda waxay qaadan doonaan imtixaan kasta oo looga baahan yahay heerka darajadooda/koorsadooda. Jaantuska hoose wuxuu soo taxaa qiimeynta la heli karo.

**QIIMEYNTA SAGE**

| Maadada | Darajooyinka/Koorsada |
|---|---|
| | 3-11 Qorista |
| **ELA** | 3–11 Akhriska, Luqadda iyo Dhageysiga |
| **Xisaab** | 3-8 Xisaabta |
| | Xisaabta Dugsiga Sare I, II, III |
| | 4-8 Sayniska |
| | Biolojiyada |
| **Saynis** | Sayniska Dunida |
| | Kiimiko |
| | Fiisiko |

## Qalabka qiimeynta SAGE waxaa laga helaa kumanaan hawl oo lagu taageero waxbarashada ardayga.

SAGE waxay ardayda ku kaalmeysaa barashada Heerarka Aqoonta Utah (Utah Core Standards) xagga heerka darajo/koorso kasta. Ardayda waxay awood u yeelan doonaan in ay helaan ilo iyo hawlaha ku celcelinta, taasoo dheeraad ku ah dhamaystirka hawsha macalinka-abuuro. Ardayda iyo qoysaska waxay awood u yeelan doonaan in ay waqti kasta, maalin ama habeen, SAGE ka galaan kombuyutar ku xeran Internetka ama tablet, iyaga oo adeegsada Aqoonsiga Ardayga (ID) iyo erayga lagu galo (password).

## Siistemka imtixaanka internetka cusub ee la siiyo ardayda waa mid sahlan xagga istcmaalka.

- Ardayda waxay isticmaali karaan kombuyutaro ama tablet si ay u qaataan qiimeynta SAGE.
- Ardayda waxay ka fa'iideysan karaan imtixanaadka tababarka laga heli karo xariirka SAGE (www.sageportal.org) si ay isugu dayaan qaar ka mid ah astaamaha siistemka imtixaanka internetka sida:
  - □balaarinta qoraalka iyo sawirada labadaba,
  - □nuurinta qeybaha la akhriyo,
  - □ka saaridda jawaabaha su'aalaha xulashada badan,
  - □baddalaadda midabada gadaal ka soo baxa,
  - □calaamadaha su'aalaha si loogu noqdo, iyo
  - □si loo yeesho awoodda qoraalka-ilaa-hadalka.
- Ardayda waxay kaloo ku ceshan karaan ka jawaabidda noocyada su'aasha kala duwan iyaga oo adeegsada imtixanaadka tababarka.
- Haddii ay u baahdaan, dhamaan ardayda waxa heli karaan qoraalka-ilaa-hadalka, kaasoo ku lug leh codka-kombuyutarka akhriya su'aalaha imtixaanka.

## Su'aalaha imtixaanka ku jira SAGE waxaa ka mid ah in badan su'aalaha xulashada badan.

Ardayda waxay samayn doonaan graafyo, waxay isdhaafsan doonaan su'aalaha sayniska, iyo waxay qori doonaan, ugana jawaabi doonaan siyaabo badan. Su'aalaha noocaan waxay qiimeyn doonaan xirfadaha fakarka heerka-sare. Si aad u aragtid noocyada su'aalaha tusaalada, waxaad imtixaanka tababarka ka qaadan kartaa www.sageportal.org/training-tests.



## Qoysaska Utah waxay filaan karaan in ay isla markiiba warbixinta ka helaan internetka.

Qoysaska waxay heli doonaan natiijada imtixaanka guga (spring) 2014 marka la gaaro xagayga (fall) 2014. Laga bilaabo xagayga (fall) 2014, qiimeynta SAGE waxay isla markiiba bixin doontaa natiijada. Qoysaska waxay natiijadahaan ka heli doonaan Siistemka Warbixinta Internetka (Online Reporting System) (ORS), kaasoo laga heli karo xariirka SAGE www.sageportal.org. Marka la fiiriyo siistemka warbixinta, qoysaska waxay arki karaan buundooyinka ardayga iyo heerarka aqoonta maado kasta oo lagu imtixaamo.